

Keydso Rasiidyada Kharashaadka Aad Ku Bixisey Waxbarashada Caruurtaada


Minnesota waxay leedahay labo barnaamij oo kaa caawinaaya kharashaadka aad ku bixisey waxbarashada caruurtaada. Barnaamijka koowaad waa mid Kharash Dhimis ah, waxaana la dhahaa **K-12 Education Subtraction**, halka barnaamijka labaadna uu yahay Tixgelin Canshuureed lana dhoho **K-12 Education Credit**. Faa’iidda labadaas barnaamij ey u leeyihiin waalidka ayaa ah, in lagaa dhimo canshuurta aad bixiso, ama laguu tixgeliyo oo la kordhiyo kharashka kaaga soo noqonaaya canshuurta Gobolka Minnesota. Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay inaad isticmaasho labada barnaamij ama midkood – waa haddii aad keydsato rasiidyada kharashaadkii kaaga baxay waxbarashada caruurtaada.

Kharashaadka Aad Sheegan Kartid

Kharash	Kharash Dhimis	Tixgelin
Qalabka Iskoolka, sida (qalimaanta, buugaagta, iyo kaalkuleytar)	Haa	Haa
Lacag aad ku bixisey iskool khaas ah	Haa	Maya
Koombiyut waxbarasho loo isticmaalaayo ama barnaamijyadiisa hadii ey ahaan lahaayeen (hardware iyo software)	Haa – illaa iyo \$200 (baad sheegan kartaa oo ey kuu sii dheer tahay tixgelinta wixii kharashaad ahaa ee ka badan \$200)	Haa – illaa iyo \$200
Kharashaadka kaaga baxa casharrada kale ee aan lagu dhigin iskoolka sida (muusingga, fanka, iyo seyniska)	Haa	Haa
Casharrada Meeriska ah ee (Tutoring) loogu sameeyo maaddooinka lagu dhigo K-12, casharradaas oo uu meeriyo ama dhigo qof macallin ah ama u qalma inuu macalin noqdo	Haa	Haa
Safar aqooneed loo aadey xero-xagaa ama (summer camps), looguna xeroodey in lagu barto (luuqadaha, fanka iyo seyniska)	Haa – Qeyb xaddidan oo lacagtaad waxbarashada ku bixisey ah baa laguu oggol yahay (kiro iyo cunto kuma jiraan)	Haa – Qeyb xaddidan oo lacagtaad waxbarashada ku bixisey ah baa laguu oggol yahay (kiro iyo cunto kuma jiraan)
Lacag lagu soo kireeyey ama lagu soo gadey qalab muusig – si loo isticmaalo intuu iskoolku socdo	Haa	Haa
Safarro waxbarasho (field trips) – loo baxay xilligii uu iskuulku furnaa	Haa	Haa

Kharashaadka Aan La Sheegan Karin

- Qalabka iskoolka ee aan loo isticmaalin waxbarshada sida (boorsada dhabarka, fasaleetiga iyo qalabka kale ee lagu camirto khaanadaha iskoolka)
- Dharka, oo uu ku jiro dharka labiska iskoolku (markii laga reebo dharka loo gashto jimicsiga (gym clothes)
- Ciyaaraha
- Cuntada iskuulka, xattaa cuntada ilmahaagu cuno markii la aadaayo safar iskooleed (field trips)
- Meeriska ama (tutoring) loogu diyaar-garoobayo imitixaannada (ACT, SAT)
- Fasaxyada uu qoyskaagu ku soo boqdo matxafyada iyo beeraha xewayaanka (Zoo-ga)



Kharash Dhimis iyo Tixgelin Canshuureed (Xanaano illaa Dugsi Sare)

Waa maxay kharash-dhimis waxbarasho, yaase u qalma?

Kharash Dhimis Waxbarasho (K-12 Subtraction) waxay kuu sahlaayaa inaad iska jartid ama iska dhintid kharashaadka kaaga baxay waxbarashada caruurtaada, oo aad ka jartid lacagaha ku soo galey ee lagaa canshuuri doono markaad xereyneysa canshuurta Gobolka Minnesota. Waxaa laguu oggol yahay inaad iska jartid kharash gaari kara illaa \$1,625 oo aad ku bixisey cunug walba oo ku jira xanaanada (kindergarten) ilaa iyo fasalka 6aad. Sidoo kale waxaad iska jari kartaa ilaa \$2,500 oo ah kharashka aad ku bixisey ilmo walba oo kuu dhigtaa 7aad ilaa fasalka 12aad.

Ma jirto **xaddidaad saaran dakhligaaga** si aad u sheegato kharashaadkaas waxbarasho, sidoo kale kuma xirna qaabkaad u xereyneysa canshuurta (sida xaaS isku-xereysanaaya ama qof kaligiis ah). Si kastaba ha ahaatee, iskoolka ilmahaagu dhigtaan waa in uu ku dhex yaallo gobollada Minnesota, Iowa, North Dakota, South Dakota ama Wisconsin.

Waa maxay tixgalin waxbarasho, yaase u qalma?

Tixgelin Waxbarasho (K-12 Education Credit) waxay kuu sahleysaa in lagaa yareeyo canshuurtii lagaa qaadi lahaa amaba kordhiso canshuurta laguu soo celinaayo. Haddii aad tahay qof ka soo bixi kara shuruudaha hoos ku xusan, waxaad sheegan kartaa tixgelinta waxbarasho – marka aad xereyneysa canshuurta Gobolka Minnesota, adoo sheeganaaya illaa boqolkii 75% kharashaadki waxbarashada caruurtaada kaaga baxay. Waad codsan kartaa tixgelinta canshuurta laguu soo celin doono – xattaa haddii aan lagugu lahayn wax canshuur dakhli ah sannadkaan.

Haddii aad leedahay:	Kharashka qoyskaagu waa inuu ka yar yahay:
1 (hal cunug) ilaa 2 (labo cunug)	\$37,500
3 (saddex caruur ah)	\$39,500
4 (afar caruur ah)	\$41,500
5 (shan caruur ah)	\$43,500
6 (lix caruur ah ama ka badan)	\$43,500 oo lagu darey \$2,000 cunug walba oo dheeri ah

Si aad xaq ugu yeelato inaad xereysato Tixgelin Waxbarasho (K-12 credit), waa inaad ku xereystaa canshuurtaada kaligaa (single), madaxa qoyska (head of household), xaaS laga dhintey (widow ‘er’) ama labo isqaba oo isku xereysanaaya (married filing a joint). Labada is-qaba laakin raba iney kala xereystaan canshuurtooda ma dalban karaan tixgelinta waxbarasho ee caruurtooda.

Warqadaha lagaaga baahan yahay

Waa inaad heystaa waraaqo caddeymo ah – sida rasiid ey ku qoran yihiin waxyaalahii aad gadatey ama biilashoodii – si aad u caddeysa inaad kharashaadkaas ku bixisey waxbarashada caruutaada, aadna rabto inaad ku xereysato kharash dhimis ama tixgelin waxbarasho, waa inaad rasiidka heysatid. Ma dalban kartid, umana isticmaali kartid kharash dhimista iyo tixgelinta-ba adigoo isticmaalaaya hal kharash oo isku mid ah.

Macluumaaad iyo Caawinaad

Haddii aad u baahan tahay macluumaaad dheeri ah, soo booqo websitekeenna oo ah www.revenue.state.mn.us ka dibna ku qor ereyga K12 meesha ey ku qoran tahay Raadi/Baar (Search), ama naga soo wac nambarkeenna ah 651-296-3781 ama 1-800-652-9094.

